**DOWLAD-GOBOLEEDKA JUBBALAND EE SOOMAALIYA**

# Xeer-nidaamiyaha 8aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

# Hawlgabka, Is-casilaadda iyo Shaqo-ka-dhammaanshaha Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

**Tusmo**

***1. Hordhac ... 1***
1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda ... 1
1.2. Mabaa'diida Hagaya ... 1
1.3. Waxa lagu maamulayo ... 1
1.4. Erey-bixinta ... 2
***2. Maareynta hawlgabka, is-casilaadda iyo shaqo-ka-dhammaanshaha ... 3***
***3. Hawlgab ... 4***
3.1. Da'da hawlgabka khasabka ah ... 4
3.2. Hawlgab khasab ah oo loo cuskadey sababo caafimaad ... 5
3.3. Is-casilaad khiyaari ah oo loo cuskadey sababo caafimaad ... 7
***4. Dhimashada qof shaqaale ah ... 9***
***5. Is-casilaad ... 10***
***6. Shaqo-ka-joojin ka dib markii ay shaqadii ka dhammaatey ... 11***
***7. Lacag loogu beddelayo muddadii ogeysiinta ... 13***
***8. Cabashooyinka & Rafcaannada ... 13***
***9. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha ... 13***

# 1. Hordhac

## 1.1. Awoodda, Hadafka iyo Baaxadda

1.1.1. Xeer-nidaamiyahan waxaa la soo saarey iyada oo laga ambaqaadayo Qodobka 31aad, Faqradda 31.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

1.1.2. Xeer-nidaamiyahan waa "xeer la diidi karo" sida loogu qeexay Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 waxaana sida ay sheegayso faqradda 1.4.1(f) marayaa muddo aan ka badneyn toban (10) maalmood oo uu dib-u-eegis ku sameynayo Baarlamaanka

1.1.3. Xeer-nidaamiyaha waxaa uu sameynayaa habraacyada ay tahay in ay raacaan Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo Hay'adda Loo Shaqeeyo marka ay la tacaamulayaan hawlgabka, is-casilaadda iyo shaqo-ka-dhammaanshaha shaqaalaha rayidka ah ee dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya

## 1.2. Mabaa'diida Hagaya

1.2.1. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa hagaya mabaa'diida naxariista, daah-furnaanta, bulsho-u-adeegga, ixtiraamidda ku kala-dambeynta maamulka, daacadnimada, sirnimada, anshax hawleed, hufnaanta, waxtarka, xirfadlenimo, xaq ku shaqeyn, sinnaan iyo hababka ugu wanaagsan ee hawlqabadka

1.2.2. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay mabaa'diidan ku saleeyaan la-dhaqankooda marka ay la tacaamulayaan saraakiisha la soo doortey, Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee ay wada shaqeeyaan, iyo dadweynaha.

1.2.3. Saraakiisha la soo doorto waa in ay mabaa'diidan ku saleeyaan la-dhaqankooda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

1.2.4. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa shaqaaleyntooda ku saleysan tahay aqoontooda iyo kartidooda ka dib marka ay ka soo baxaan habraacyada soo-xulidda ee uu dhigayo sharcigan iyo xeer-nidaamiyeyaasha iyo dhabbe-tuseyaasha la xiriira.

## 1.3. Waxa lagu maamulayo

1.3.1. Marka laga reebo waxa xagga hoose lagu cayimey, xeer-nidaamiyahan waxaa lagu maamulayaa hawlgabka, is-casilaadda iyo shaqo-ka-dhammaanshaha dhammaan shaqaalaha maamulka iyo maareynta ee Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee waqti buuxa iyo kuwa waqti gaaban shaqeeya ee Dowlad-goboleedka Jubbaland oo mushaarkooda laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan

1.3.2. Xeer-nidaamiyahan waxaa sidoo kale lagu maamulayaa shaqaalaha loo magacaabey jagooyin ka mid ah Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee maaliyaddoodu ay bixinayaan deeq-bixiyeyaal, sida ku xusan Qodobka 22aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017

1.3.3. Xeer-nidaamiyahan laguma maamulayo:

a) Xubnaha ka tirsan ciidanka booliska, ciidamada amniga, iyo ciidamada qalabka sida
b) Xubnaha garsoorka
c) Saraakiisha la soo doorto
d) Wasiirrada, Wasiir-ku-xigeennada iyo xubnaha golayaasha ama Guddiyada uu magacaabo Madaxweynaha
e) Shaqaalaha sharikaadka ganacsi ee ay dowladdu leedahay oo u shaqeeya qaab ganacsi
f) Shaqaalaha loo qorto Qandaraasyo Muddo Go'an socda si ay u bixiyaan adeegyo xirfadeed kuwaas oo ah kuwo gaar ah oo ka madax-bannaan hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
g) Shaqaalaha u shaqeeya qandaraasle ay dowladdu u qaadatey in uu bixiyo adeegyo.

1.4. <u>Erey-bixinta</u>

1.4.1. Xeer-nidaamiyahan dhexdiisa, ereyadan waxaa ay yeelanayaan macnaha soo socda;

a) ***"Guddiga Rafcaanka***" waxaa loola jeedaa hay'adda uu Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah u magacaabo in ay dhegeysato rafcaannada ka dhanka ah ciqaabaha anshax-marinta ah ama cabashooyinka ka dhasha go'aamo ay gaartey Hay'ad Loo Shaqeeyo.

b) ***"Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed"*** waxaa loola jeedaa qof u shaqeeya Hay'ad Loo Shaqeeyo oo mushaarkiisa laga bixiyo Miisaaniyadda Mideysan ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya sida ay dhigeyso faqradda 4.1e) ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

c) ***"Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda"*** waxaa loola jeedaa Shaqaalaha Rayidka ee Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya. Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladdu waxaa ay si waafaqsan qodobbada xeerkan u qabtaan dhammaan hawlaha fulinta iyo kuwa maamul iyo adeeg-bixin ee Dowladda.

d) ***"Guddiga"*** waxaa loola jeedaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ee lagu dhisey Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

e) ***"Madax-Waaxeed"*** waxaa loola jeedaa waax heerkeedu gaarsiisan yahay Agaasime.

f) ***"Xeer la diidi karo"***waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiye uu Baarlamaanku u haysto muddo cayiman oo uu kaga soo horjeesan karo (diidi karo) ka hor inta *Xeer-nidaamuyuhu* dhaqangal noqon.

g) ***"Hay'ad Loo Shaqeeyo"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad, wakaalad ka tirsan Wasaarad, ama Guddi Madax-bannaan oo Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya ka mid ah oo shaqaaleysta Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

h) ***Qof Shaqaale ah"*** waxaa loola jeedaa Qof Shaqaale Rayid ah oo Dowladeed ah oo ay shaqaaleysatey Hay'ad Loo Shaqeeyo..

i) ***"Madaxa Hay'adda Loo Shaqeynayo"*** waxaa uu macnaheedu yahay Agaasimaha Guud (Xoghayaha Joogtada ah) ee Wasaarad ama sarkaal gacanta ku haya hawlaha fulinta ee Hay'adda Loo Shaqeynayo

j) ***"Tilmaammo/amarro"***waxaa loola jeedaa xeerar, buugaag, amarro, dhabbe-tuseyaal iyo ogeysiisyo waxaana soo saara Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo u maraya Guddoomiyaha Guddiga. Tilmaamaha (amarrada) waxaa ay caadi ahaan tahay in islamarkaa ama waqti cayiman lagu fuliyo.

k) ***"Maareeye"*** waxaa loola jeedaa qofka sida tooska ah uu u hoos tago Qofka ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda

l) ***"Wasaarad"*** waxaa loola jeedaa Wasaarad ka mid ah Laanta Fulinta ee la dhisey iyada oo la raacayo dastuurka Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya.

m) ***"Xeer-nidaamiye"***waa *xeer la diidi karo* oo bixinaya xeerar faahfaahsan oo uu diyaariyo uuna soo saaro Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si loogu hawlgeliyo waxyaabaha uu dhigayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017. Xeer-nidaamiyeyaashan waa kuwo ay waajib tahay in loo hoggaansamo laakiin ma aha Xeer uu soo saarey Baarlamaanka.

n) ***"Hawlgab sababo caafimaad"***waxaa loola jeedaa hawlgab loo cuskadey sababo awood la'aan, xanuun ama naafanimo xagga dhimmirka ah ama mid jireed.

## 2. Maareynta hawlgabka, is-casilaadda iyo shaqo-ka-dhammaanshaha

2.1. Maareynta hawlgabka, is-casilaadda iyo shaqo-ka-dhammaanshaha waxaa mas'uuliyaddeeda leh Wasaarad kale oo Kasta iyada oo la tashaneysa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

2.2. Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaarad kale oo Kasta ayaa mas'uul ka ah qorsheynta Shaqaalaha si ay u hubiso in hawlgabka, is-casilaadda iyo shaqo-ka-dhammaanshaha shaqaalaha Wasaaraddooda loo maareeyo si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan.

2.3. Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo ayaa la tashanaya Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed iyo Madax-waaxeedyada si uu u hubiyo in kharashaadka hawlgabka, is-casilaadda iyo shaqo-ka-dhammaanshaha lagu daro miisaaniyad-sanadeedda. Kharashaadkani waa kuwa la xiriira lacagta lagu bixiyo fasax-sanadeedka aan la qaadan, lacagta xaqa ah ee la siiyo shaqaalaha hawlgabka gala ama shaqadu ka dhammaato, iyo kharashka ku baxa in shaqaale loo qoro jagooyinka ku bannaanaada hawlgab iyo is-casilaad. Haddii loogu baahan yahay ujeeddooyin la xiriira maaliyad-siin, Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waxaa ay la tashan kartaa Guddiga

Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaana ay ka xaqiijin kartaa xisaabinta xaqa la siinayo shaqaalaha hawlgabka noqda iyo kuwa shaqadu ka dhammaato.

# 3. Hawlgab

3.1. Da'da hawlgabka khasabka ah

3.1.1. Shaqaalaha waxaa looga baahan yahay in ay hawlgab ka noqdaan shaqada dowladda marka ay da'doodu gaarto 65 sano sida uu dhigayo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Guddiga ayaa siinaya hal bil oo ogeysiis ah oo uu ugu sheegayo in qandaraaskooda shaqada uu dhammaayo maaddaama ay gaareen da'dii hawlgabka isaga oo adeegsanaya waraaqda loogu talogaley (eeg Foomka 8.1 ee la socda Tilmaanta H ee CSC). Nuqul ka mid ah waraaqdan waa in loo diraa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda kale ee ay khuseyso si loo ogeysiiyo in qofka shaqaalaha ah uu hawlgab gelayo. Nuqul waraaqdan ah waa in la geliyaa galka shaqada ee qofka shaqaalaha ah.

3.1.2. Shaqaalaha hawlgabka u galey in ay gaareen da'dii hawlgabka waxaa ay leeyihiin xaqa muddadii ay soo shaqeynayeen oo loo xisaabinayo hal bil mushaarkeeda sanad kasta oo ay shaqada ku jireen kaas oo ku sar go'an heerka darajada iyo mushaarka markii uu qofkaa shaqaalaha ah hawlgabka galey. Mushaarkan isaga oo xirmo ah ayaa mar la bixinayaa. Qiimaha fasax-sanadeedka uu xaqa u leeyahay ee uusan weli qaadan ayaa sidoo kale la bixinayaa.

3.1.3. Marka qof shaqaale ah uu hawlgab u galo in uu gaarey da'dii hawlgabka daraaddeed Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waxaa ay xisaabineysaa lacagta xaqa loo siinayo iyo lacagaha kale ee uu dadku leeyahay ee aan weli la siinin sida fasax oo kale iyada oo adeegsaneysa **Foomka 8.2** (ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), waxaana ay u direysaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyada oo u sii marineysa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo, si uu Guddigu u xaqiijiyo saxnaanta lacagta la xisaabiyey ka hor inta aan la sameyn dokumentiyada mushaaraadka si loo hubiyo in lacagaha la bixinayo ay sax yihiin.

3.1.4. Ka dib marka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu qoraal ku soo xaqiijiyo xisaabinta lacagta la bixinayo, ayaa faahfaahinta lacagta la bixinayo lagu qorayaa foomka kooban ee mushaarka oo uu la socdo nuqul **Foomka 8.2** ee la ansaxiyey (ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), waxaana loo gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda si ay uga mid dhigto mishaaraadka bisha ee la bixinayo.

3.1.5. Marka uu hawlgab galo qof ka mid ah shaqaalaha, Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Kale ee uu u shaqeeyo waa in ay iyada oo adeegsaneysa **Dokumentiga 13** ee la socda Tilmaanta A ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ay ee Dowladda ay Wasaaradda Maaliyadda ka codsataa in ay cusbooneysiiso xogta qofka shaqaalaha ah

ee ku jirta Bisan si ay u muujiso in qofka shaqaalaha ah ee ay khuseyso uu hawlgab noqdey iyo taariikhda uu hawlgabka galey si loo hubiyo in qofka shaqaalaha ahaa uusan helin mushaar aanu xaq u lehayn.

3.1.6. Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda kale iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay hubiyaan in xog kasta oo shaqaalenimo oo la xiriirta qofka shaqaalaha ah ee hawlgabka noqdey la cusbooneysiiyo si ay u muujiso in qofkaa shaqaalaha ah uu hawlgab noqdey iyo taariikhda uu hawlgabka galey.

3.2. Hawlgab khasab ah oo loo cuskadeysababo caafimaad

3.2.1. Qof shaqaale ah oo da'diisu ka weyn tahay 50 sano ayna da'diisu ka yar tahay da'da caadiga ee hawlgabka khasabka ah sida ay dhigeyso faqradda 3.1.1 ayaa hawlgab waqtigiisii ka soo hormarey geli kara haddii qofkaa shaqaalaha ah uusan shaqadii uu dowladda u hayey si hufan ugu sii wadan karin sababo awood la'aan, xanuun ama naafanimo xagga dhimmirka ama jirka ah.

3.2.2. Maareeye kasta waa in uu Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ku soo wargeliyaa haddii uu aaminsan yahay in qof shaqaale ah uusan waajibaadkiisii uga soo bixi karin xanuun caafimaad-xumo iyo jireed ama naafanimo muddo dheer jiraya. Arrintan oo kale waxaa tilmaan unoqon kara qof shaqaale ah oo muddooyin aan yareyn shaqada uga maqnaada fasax caafimaad.

3.2.3. Iyada oo la tashaneysa Madax-waaxeedka, ayaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waxaa ay ku talin kartaa in qof shaqaale ah oo aan awoodin in uu qabto shaqada uu hadda hayo sababo la xiriira awood la'aan, xanuun ama naafanimo loo wareejiyo shaqo kale oo awood-darrada, xanuunka ama naafanimada qofka shaqaalaha ahi aaney saameyneynin sida uu qofka shaqaalaha ah u qaban karo hawshiisa haddii jagada noocaas ahi ay bannaan tahay iyo marka uu Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda u ansaxiyo si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 1aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Habraacyada shaqo-qorista, dalacsiinta iyo beddelaadda shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

3.2.4. Haddii Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed aaney qofka shaqaalaha ah u beddeli karin jago kale oo bannaan oo uu awood-darrada, xanuunka ama naafanimada qofka shaqaalaha ah aaney saameyn ku yeelaneynin sida uu qofka shaqaalaha ah u qaban karo hawshiisa, markaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waa in ay takhtar caafimaad oo diiwaan gashan ay talo ka weydiisaaa xaaladda caafimaad ee qofkaas shaqaalaha ah.

3.2.5. Si hawlgab loo cuskadey xaalad caafimaad loo geliyo qof shaqaale ah, waa in la helaa shahaaddo caafimaad iyo warbixin caafimaad oo madax-bannaan oo uu soo saarey takhtar caafimaad (mid dowladeed ama mid gaar ah) oo ay magacaydey Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed. Shahaaddadacaafimaad iyo warbixinta caafimaad waa in uu ku jiraa ra'yi ku saabsan in qofka shaqaalaha ahi uu si dad ku filan uga soo kaban karo awood-darrada, xanuunka ama naafanimada taas oo u oggolaaneysa in uu

qofka shaqaalaha ahi uu sii wato shaqada uu ka hayo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo in kale.

3.2.6. Haddii, marka ay hesho shahaaddada caafimaad iyo warbixinta caafimaad, ay Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ay ku qanacdo in qofka shaqaalaha ah hawlgab loo geliyo sababo caafimaad daraaddood, markaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Dowladda waa in ay nuqulka warbixinta caafimaadka u gudbisaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyada oo u sii marineysa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo, iyada oo codsaneysa in qofka shaqaalaha ah la geliyo hawlgab ku saleysan sababo caafimaad.

3.2.7. Marka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu ansaxiyo in qofka shaqaalaha ah hawlgab loo geliyo sababo caafimaad daraaddood, markaa Guddoomiyaha Guddiga ayaa Qofka shaqaalaha ah siinaya hal biloo ogeysiin ah oo lagu joojinayo qandaraaska shaqaalenimo ee qofka shaqaalaha ah sababo caafimaad daraaddood iyada oo la adeegsanayo waraaqda jaango'an ee loogu talogaley (eeg **Foomka 8.3** ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda). Nuqul waraaqdan ah waa in loo diraa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Kale ee ay khuseyso taas oo lagu ogeysiinayo in qofka shaqaalaha ah la gelin doono hawlgab. Nuqul waraaqdan ah waa in la geliyo galka shaqada ee qofka shaqaalaha ah.

3.2.8. Shaqaalaha gala hawlgab ku saleysan sababo caafimaad waxaa la siinayaa xaqooda oo ah hal bilmushaarkeed sanad kasta oo ay ku dhammeysteen shaqada marka ay hawlagabka galeyaa taas oo ah heerkii darajo iyo mushaarkii maalinta qofka shaqaalaha ah uu hawlgab noqdey. Mushaarkan ayaa la bixinayaa isaga oo hal xirmo ah. Qiimaha fasax-sanadedka aan la qaadan ayaa sidoo kale la bixinayaa.

3.2.9. Marka qof shaqaale ah hawlgab looga dhigo sababo caafimaad daraaddood markaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waxaa ay xisaabineysaa lacagta xaqa ah ee ay tahay in la siiyo waxaana ay ku qoreysaa**Foomka 8.2** (ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), waxaana ay u direysaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyada oo u sii marineysa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo, si uu Guddigu u xaqiijiyo saxnaan lacagta la xisaabiyey ka hor inta aan la diyaarin dokumentiyada mushaaraadka si loo hubiyo in lacagaha la bixinayo ay sax yihiin.

3.2.10. Ka dib marka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu qoraal ku soo ansaxiyo xisaabinta lacagta la bixinayo, ayaa faahfaahinta lacagta la bixinayo lagu qorayaa foomka kooban ee mushaarka oo uu la socdo nuqul **Foomka 8.2** ee la ansaxiyey (ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), waxaana loo gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda si ay uga mid dhigto mishaaraadka bisha ee la bixinayo

3.2.11. Marka uu hawlgab galo qof ka mid ah shaqaalaha, Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Kale ee uu u shaqeeyo waa in ay iyada oo adeegsaneysa **Dokumentiga 13** ee la socda Tilmaanta

A ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ay ee Dowladda ay Wasaaradda Maaliyadda ka codsataa in ay cusbooneysiiso xogta qofka shaqaalaha ah ee ku jirta Bisan si ay u muujiso in qofka shaqaalaha ah ee ay khuseyso uu hawlgab noqdey iyo taariikhda uu hawlgabka galey si loo hubiyo in qofka shaqaalaha ahaa uusan helin mushaar aanu xaq u lehayn.

3.2.12. Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda kale iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay hubiyaan in xog kasta oo shaqaalenimo oo la xiriirta qofka shaqaalaha ah ee hawlgabka noqdey la cusbooneysiiyo si ay u muujiso in qofkaa shaqaalaha ah uu hawlgab noqdey iyo taariikhda uu hawlgabka galey.

3.3. <u>Is-casilaad khiyaari ah oo loo cuskadey sababo caafimaad</u>

3.3.1. Marka laga soo tago sida ay dhigayaan 3.2.1 ilaa 3.2.6 ayaa haddana qof shaqaale ah waxaa uu qoraal ku soo codsan karaa in uu Guddigu u oggolaado in uu goor hore hawlgab noqdo sababo caafimaad daraaddood.

3.3.2. Xaaladdan oo kale marka ay timaaddo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waxaa uu ogeysiinayaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed oo la tashaneysa Maareeyaha qofka shaqaalaha ah si ay u eegto in uu aaminsan yahay in qofka shaqaalaha ah uusan awoodin in uu guto waajibaadyadiisa sababo caafimaad ama xanuun ama naafanimo jireed daraaddood. Arrintan oo kale waxaa tilmaan u noqon kara qof shaqaale ah oo muddooyin aan yareyn shaqada uga maqnaada fasax caafimaad.

3.3.3. Haddii Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed aaney qofka shaqaalaha ah u beddeli karin jago kale oo bannaan oo awood la'aanta, xanuunka ama naafanimada aaney saameyn ku yeelan karin sida uu qofkaa shaqaalaha ah uga soo baxayo waajibaadyadiisa si waafaqsan faqradda 3.2.3 ee xeer-nidaamiyahan, markaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waa in ay talo weydiisataa takhtar caafimaad oo diiwaangashan.

3.3.4. Codsi lagu codsanayo hawlgab waqtigiisii ka soo hormara waa in lagu xoojiyaa shahaado caafimaad iyo warbixin caafimaad oo madax-bannaan oo uu soo saarey takhtar caafimaad (mid dowladeed ama mid gaar ah) oo ay magacowdey Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed. Shahaaddada Caafimaad iyo Warbixinta Caafimaad waa in uu ku jiraa ra'yi ku saabsan in qofka shaqaalaha ahi uu si dad filan uga soo kaban karo awood-darrada, xanuunka ama naafanimada taas oo u oggolaaneysa in uu qofka shaqaalaha ahi uu sii wato shaqada uu ka hayo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyo in kale.

3.3.5. Haddii, marka ay hesho shahaaddada caafimaad iyo warbixinta caafimaad, ay Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ay ku qanacdo in qofka shaqaalaha ah loo oggolaado in hawlgab soo hormara uu u galo sababo caafimaad daraaddood, markaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Dowladda waa in ay waraaq u qortaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyada oo u sii marineysa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo, iyada oo raacineysa nuqulka warbixinta caafimaadka ayna Guddiga Shaqaalaha ah

ka codsata qoraal ansaxinaya in qof shaqaale ah hawlgab la geliyo isaga aaney da'diisu gaarin 65 sano iyada oo loo cuskanayo sababo caafimaad.

3.3.6. Marka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu ansaxiyo in qofka shaqaalaha ah loo oggolaado in hawlgab u galo sababo caafimaad daraaddood, markaa Guddoomiyaha Guddiga ayaa Qofka shaqaalaha ah siinaya hal bil oo ogeysiin ah oo lagu joojinayo qandaraaska shaqaalenimo ee qofka shaqaalaha ah sababo caafimaad daraaddood iyada oo la adeegsanayo waraaqda jaango'an ee loogu talogaley (eeg **Foomka 8.4** ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda). Nuqul waraaqdan ah waa in loo diraa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Kale ee ay khuseyso taas oo lagu ogeysiinayo in qofka shaqaalaha ah la gelin doono hawlgab. Nuqul waraaqdan ah waa in la geliyo galka shaqada ee qofka shaqaalaha ah.

3.3.7. Shaqaalaha goor hore gala hawlgab loo cuskadey sababo caafimaad waxaa la siinayaa xaqooda oo ah hal bilmushaarkeed sanad kasta oo ay ku dhammeysteen shaqada marka ay hawlgabka galeyaan taas oo ah heerkii darajo iyo mushaarkii maalinta qofka shaqaalaha ah uu hawlgab u noqdey sababo caafimaad daraaddood. Mushaarkan ayaa la bixinayaa isaga oo hal xirmo ah. Qiimaha fasax-sanadedka aan la qaadan ayaa sidoo kale la bixinayaa.

3.3.8. Marka qof shaqaale ah uu goor hore galo hawlgab ku yimid sababo caafimaad daraaddood markaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Kale ee ay khuseyso waxaa ay xisaabineysaa lacagta xaqa ah iyo lacagaha kale ee u harsan sida fasaxa uusan weli qaadan iyada oo adeegsaneysa **Foomka 8.2** (ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), waxaana ay u direysaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyada oo u sii marineysa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo si uu Guddigu u xaqiijiyo ka hor inta aan la diyaarin dokumentiyada mushaaraadka si loo hubiyo in lacagaha la bixinayo ay sax yihiin.

3.3.9. Ka dib marka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu qoraal ku soo ansaxiyo xisaabinta lacagta la bixinayo, ayaa faahfaahinta lacagta la bixinayo lagu qorayaa foomka kooban ee mushaarka oo uu la socdo nuqul **Foomka 8.2** ee la ansaxiyey ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, waxaana loo gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda si ay uga mid dhigto mishaaraadka bisha ee la bixinayo.

3.3.10. Marka uu hawlgab galo qof ka mid ah shaqaalaha, Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Kale ee uu u shaqeeyo waa in ay iyada oo adeegsaneysa **Dokumentiga 13** ee la socda Tilmaanta A ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ay ee Dowladda ay Wasaaradda Maaliyadda ka codsataa in ay cusbooneysiiso xogta qofka shaqaalaha ah ee ku jirta Bisan si ay u muujiso in qofka shaqaalaha ah ee ay khuseyso uu hawlgab noqdey iyo taariikhda uu hawlgabka galey si loo hubiyo in qofka shaqaalaha ahaa uusan helin mushaar aanu xaq u lehayn.

3.3.11. Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda kale iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay hubiyaan in xog kasta oo shaqaalenimo oo la xiriirta qofka shaqaalaha ah ee hawlgabka noqdey la cusbooneysiiyo si ay u muujiso in qofkaa shaqaalaha ah uu hawlgab noqdey iyo taariikhda uu hawlgabka galey.

# 4. Dhimashada qof shaqaale ah

4.1. Marka qof shaqaale ah uu dhinto inta uu ku jiro shaqada dowladda waa in islamarkiiba lagu wargeliyaaa Madaxa Waaxdauu ka shaqeeyo iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

4.2. Haddii qofka shaqaalaha uu dhinto isaga oo shaqo ku jira markaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waxaa ay hubineysaa in hay'adaha u habboon iyo qoyska loogu wargeliyo sida ugu dhaqso ee loo sameyn karo.

4.3. Haddii qof shaqaale ah uu dhinto inta uu shaqada ku jiro, qoyskiisa/keeda (waalidiinta, xaaska iyo carruurta ku tiirsan) waxaa ay xaq u yeelanayaan in la siiyo hal bil mushaarka aasaasiga ah ee sanad kasta oo uu shaqada ku jirey ilaataariikhda uu dhintey iyofasaxa uu xaqa u lahaa ee uusan weli qaadan Qofkaa Shaqaalaha ah. Xaqa waxaa lagu bixinayaa heerkii darajada iyo mushaarka markii uu qofkaa shaqaalaha ah dhintey. Mushaarkan isaga oo xirmo ah ayaa mar la bixinayaa.

4.4. Lacagta xaqa ah waa in si toos ah loogu shubaa xisaab banki oo heshiis ay ku yihiin oo ay soo magacaabaan qoyska qofka shaqaalaha ah.

4.5. Marka qof shaqaale ah uu dhinto inta uu shaqada ku jiro markaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Kale ee ay khuseyso waxaa ay xisaabineysaa lacagta xaqa ah iyo lacagaha kale ee e u harsan sida fasaxa uusan weli qaadan iyada oo adeegsaneysa **Foomka 8.2** ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, waxaana ay u direysaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyada oo u sii marineysa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo si uu u xaqiijiyo ka hor inta aan la diyaarin dokumentiyada mushaaraadka si loo hubiyo in lacagaha la bixinayo ay sax yihiin.

4.6. Ka dib marka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu qoraal ku soo ansaxiyo xisaabinta lacagta la bixinayo, ayaa faahfaahinta lacagta la bixinayo lagu qorayaa foomka kooban ee mushaarka iyada oo uu la socdo nuqul **Foomka 8.2** ee la ansaxiyey (ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), waxaana loo gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda si ay uga mid dhigto mishaaraadka bisha ee la bixinayo si waafaqsan Faqradda 4.4 ee Xeer-nidaamiyahan.

4.7. Marka uu dhinto qof ka mid ah shaqaalaha inta uu shaqada ku jiro, Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Kale ee uu u shaqeeynayey waa in ay iyada oo adeegsaneysa **Dokumentiga 13** ee la socda Tilmaanta A ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ay Wasaaradda Maaliyadda ka codsataa in ay cusbooneysiiso xogta qofka shaqaalaha ah ee ku jirta Bisan si ay u muujiso in qofka shaqaalaha ah ee ay khuseyso uu dhintey iyo taariikhda uu dhintey si loo hubiyo in qofka shaqaalaha ahaa uusan helin mushaar aanu xaq u lehayn.

4.8. Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda kale iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay hubiyaan in xog kasta oo shaqaalenimo oo la xiriirta qofka shaqaalaha ah ee dhintey la cusbooneysiiyo si ay u muujiso in qofkaa shaqaalaha ah uu dhintey iyo taariikhda uu dhintey.

# 5. Is-casilaad

5.1. Qofka shaqaalaha waxaa looga baahan yahay in uu bil ka hor si qoraal ah uu ugu soo wargeliya Madaxa Waaxdauu ka shaqeeyo in uu ku talojiro in uu iska casilo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda. Madaxa Hay'adda waa in uu nuqul waraaqdaas ah uu siiyaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed taas oo geeddi-socodka is-casilaadda u bilaabeysa si waafaqsan faqradaha 5.3 ilaa 5.7 ee xeer-nidaamiyahan.

5.2. Taariikhda is-casilaadda waxaa loo qaadanayaa in ay tahay taariikhda waraaqda is-casilaadda la siiyo Madaxda Waaxdauu qofkaa ka shaqeeyo.

5.3. Qofka shaqaalaha ah ee is-casila lama siinayo xaq. Qiimaha fasax-sanadeedka uusan qaadan ayaase la siinayaa.

5.4. Marka uu qof shaqaale ah is-casilo Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed waxaa ay xisaabineysaa lacagta uu weli dad ku leeyahay sida fasax uu lahaa oo uusan weli qaadan iyada oo adeegsaneysa **Foomka 8.2** (ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), waxaana ay u direysaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyada oo u sii marineysa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo, si uu Guddigu u xaqiijiyo saxnaanta lacagta la xisaabiyey ka hor inta aan la sameyn dokumentiyada mushaaraadka si loo hubiyo in lacagaha la bixinayo ay sax yihiin.

5.5. Ka dib marka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu qoraal ku soo ansaxiyo xisaabinta lacagta la bixinayo, ayaa faahfaahinta lacagta la bixinayo lagu qorayaa foomka kooban ee mushaarka iyada oo uu la socdo nuqul **Foomka 8.2** ee la ansaxiyey (ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), waxaana loo gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda si ay uga mid dhigto mushaaraadka bisha ee la bixinayo.

5.6. Marka uu is-casilo qof ka mid ah shaqaalaha, Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Kale ee uu qofkaa u shaqeeyo waa in ay iyada oo adeegsaneysa **Dokumentiga 13** ee la socda Tilmaanta A ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ay Wasaaradda Maaliyadda ka codsataa in ay cusbooneysiiso xogta qofka shaqaalaha ah ee ku jirta Bisan si ay u muujiso in qofka shaqaalaha ah ee ay khuseyso uu is-casiley iyo taariikhda uu is-casiley si loo hubiyo in qofka shaqaalaha ahaa uusan helin mushaar aanu xaq u lehayn.

5.7. Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda kale iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay hubiyaan in xog kasta oo shaqaalenimo oo la xiriirta qofka shaqaalaha ah ee is-casiley la cusbooneysiiyo si ay u muujiso in qofkaa shaqaalaha ah uu is-casiley iyo taariikhda uu is-casiley.

5.8. Qof horey uga tirsanaa Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda oo is-casiley waxaa uu xaq u leeyahay in uu dib ugu soo biiro Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda keliya marka ay ka soo wareegato 12 bilood maalintii ugu dambeysey ee uu ka

tirsanaa Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, iyo haddii uu/ay arji u soo qorto/qoroto jago bannaan oo loona qaato jagadaas iyada oo loo marayo geeddi-socodka shaqo-qorista caadiga ah ee lagu tartamo. Muddada tijaabinta ee laga rabo iyo shuruudaha mushaarka waxaa ay noqonayaan isla kuwa qof aan horey uga tirsanaan jirin Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

# 6. Shaqo-ka-joojin ka dib markii ay shaqadii ka dhammaatey

6.1. Haddii qof ka tirsan Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ay dhacdo in aan loo sii baahneyn taas oo is-beddel ku yimid hawlaha Hay'adda Loo Shaqeeyo ama wax kale oo dhacay ay keenaan in xafiis ama barnaamij loo xiro si waafaqsan faqradda 6.3, qofka jagadaa haya waxaa uu Guddigu siinayaa bil ogeysiin ah oo loogu sheegayo in qandaraaska loo joojinayo shaqada ka dhammaatey daraaddeed, iyada oo la adeegsanayo waraaqda caadiga ah ee jaango'an (ee **Foomka 8.5** ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda). Nuqul waraaqdan ah waa in loo diraa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Kale ee qofkaa shaqada laga joojinayo. Nuqul waraaqdan ah waa in la geliyo galka shaqada ee qofkaa shaqaalaha ah.

6.2. Qof shaqaale ah shaqada lagama joojinayo iyada oo aan marka hore oggolaansho laga helin Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

6.3. Sababaha jagooyinka looga dhigayo kuwo shaqadoodu dhammaatey waxaa ka mid ahaan kara laakiin aaney ku koobneyn in:

a) la baabi'iyo hawlo ama waxqabadyo ay lahayeen Wasaarad, Waax ama Xafiis;

b) dib-isugu-habeyn lagu sameeyo maamulka taas oo ay ka mid tahay dib-u-qaabeyn iyo dib-u-nidaaminta hay'adda si loo kordhiyo hufnaanta hawl-galka iyo wax-soo-soorka;

c) hawlaha ama waxqabadyada laga wareejiyo hay'ad loo shaqeeyo oo loo wareejiyo mid kale iyada oo shaqaalihii hawlahaas qabanaayey aan sidoo kale lala wareejineyn;

d) la iibiyo ama qayb ahaan la iibiyo wakaalad Dowladeed ama ganacsiyo gaar loo leeyahay lagala heshiiyo in ay bixiyaan adeegyadii ay dowladdu bixin lahayd;

e) caqabado maaliyadeed oo ka dhashey dakhliga oo hoos u dhacay oo sababey in la waayo maaliyado lagu bixiyo ujuurooyinka iyo mushaaradka oo beddesha arrimaha ay dowladdu mudnaanta siineyso;

f) tiknolojiyad cusub ama tiknoolajiyad is-beddeshey oo keentey in kor loo qaado waxbarshada iyo xirfadaha loogu baahan yahay in shaqada lagu soo galo oo aaney xubnaha shaqaalaha lahayn, ama aan lagu tababari karin.

6.4. Shaqaalaha la ogeysiiyey in ay shaqadu ka dhammaatey waxaa ay codsan karaan in loo beddelo jago ka bannaan meel kale oo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ka mid ah; oo isku Heerkii Darajo ay yihiin toodii sida uu tilmaamayo Xeer-nidaamiyaha 1aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda:

Habraacyada shaqo-qorista, dalacsiinta iyo beddelaadda shaqaalaha rayidka ah ee dowladda.

6.5. Shaqaalaha shaqadu ka dhammaatey ee aan loo beddeli karin jago kale waxaa ay leeyihiin xaqa muddadii ay soo shaqeynayeen oo loo xisaabinayo hal bil mushaarkeeda aasaasiga ah sanad kasta oo ay shaqada ku jireen kaas ku sar go'an heerka darajada iyo mushaarka taariikhdii ay qofkaa shaqaalaha ah shaqadu ka dhammaatey. Mushaarkan isaga oo xirmo ah ayaa mar la bixinayaa, sidoo kalena qiimaha fasax-sanadeedka uu xaqa u leeyahay ee uusan weli qaadan ayaa la bixinayaa.

6.6. Marka qof shaqaale ah oo shaqada ka dhammaatey looga joojinayo shaqada waxaa Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ay xisaabineysaa lacagta xaqa ah iyo lacagta kale ee uu dad ku leeyahay sida fasax iyada oo adeegsaneysa**Foomka 8.2** (ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), waxaana ay u direysaa Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda iyada oo u sii marineysa Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo, si uu Guddigu u xaqiijiyo saxnaanta lacagta la xisaabiyey ka hor inta aan la sameyn dokumentiyada mushaaraadka si loo hubiyo in lacagaha la bixinayo ay sax yihiin.

6.7. Ka dib marka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda uu qoraal ku soo xaqiijiyo xisaabinta lacagta la bixinayo, ayaa faahfaahinta lacagta la bixinayo lagu qorayaa foomka kooban ee mushaarka oo uu la socdo nuqul **Foomka 8.2** ee la ansaxiyey (ee la socda Tilmaanta H ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda), waxaana loo gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda si ay uga mid dhigto mishaaraadka bisha ee la bixinayo.

6.8. Marka qof ka mid ah shaqaalaha shaqada looga joojiyo shaqada oo ka dhammaatey daraaddeed, Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda Kale ee uu u shaqeeyo waxaa ay iyada oo adeegsaneysa **Dokumentiga 13** ee la socda Tilmaanta A ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ay ee Dowladda ay Wasaaradda Maaliyadda ka codsaneysaa in ay cusbooneysiiso xogta qofka shaqaalaha ah ee ku jirta Bisan si ay u muujiso in qofka shaqaalaha ah ee ay khuseyso shaqada ay ka dhammaatey iyo taariikhda ay shaqada ka dhammaateysi loo hubiyo in qofka shaqaalaha ahaa uusan helin mushaar aanu xaq u lehayn.

6.9. Waaxda Shaqaalaha/Adeegyada Hay'adeed ee Wasaaradda kale iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda waa in ay hubiyaan in xog kasta oo shaqaalenimo oo la xiriirta qofka shaqaalaha ah ee shaqadu ka dhammaatey la cusbooneysiiyo si ay u muujiso in qofkaa shaqaalaha ah ay shaqadu ka dhammaatey iyo taariikhda ay shaqadu ka dhammaatey.

6.10. Qof Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ka tirsanaa oo shaqada oo dhammaatey daraaddeed looga joojiyey shaqada waa in aan dib loogu magacaabin in uu ka mid noqdo Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda.

6.11. Marka jago lagu dhigo mid shaqadu ka dhammaatey waa in la cusbooneysiiyo qaab-dhismeedka hay'adeed loona gudbiyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda si uu u ansaxiyo. Qofka shaqaalaha ah ee shaqadu ka dhammaato cid kale laguma beddelayo maaddaama jagadaasi ay shaqadeedu dhammaatey.

6.12. Marka laga soo tago sida ay tilmaayso Qaybta 6aad ee xeer-nidaamiyahan, qof shaqaale ah oo shaqada oo ka dhammaatey daraaddeed shaqada looga joojiyo waxaa lagu maamulayaa shuruudihii caadiga ahaa ee shaqada Shaqaalaha Rayidka ee Dowladda ilaa laga gaaro dhammaadka muddada ogeysiinta ah ee la siiyey. Haddii qofka shaqaalaha ah shaqada looga saaro si waafaqsan Xeer-nidaamiyaha 4aad ee Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda: Anshaxa iyo wax-kaqabashada anshax-xumada waa in uusan yeelan lacagta xaqa ah ee la bixiyo.

6.13. Marka qof shaqaale ah oo shaqadu ka dhammaatey uu sugayo tallaabo anshax-marin oo ka dhan ah, shaqada lagama joojinayo, ilaa laga gabagabeeyo hawlaha maamul ee anshaxa la xiriira. Haddii qofka shaqaalaha ah shaqada laga saaro/eryo waxaa lagu maamulayaa faqradda 6.12.1.

6.14. Qofka shaqaalaha ah ee is-casila ama hawlgabka gala ka hor inta aanu Madaxa Waaxda ku dhawaaqin jiritaanka xaalad shaqo-dhammaansho, waa in aanu yeelan lacagta xaqa ah ee la siiyo kuwa shaqada looga joojiyey shaqada oo dhammaatey daraaddeed.

## 7. Lacag loogu beddelayo muddadii ogeysiinta

7.1. Haddii loo arko in ay tahay tan ugu wanaagsan ee ayku jirto danta Wasaaradda, Madaxa Hay'adda Loo Shaqeeyo waxaa uu marka uu oggolaado Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda, ansaxin karaa in qofka shaqaalaha ah ee is-casiley ama hawlgabka noqdey, lacag loogu beddelo muddadii ogeysiinta.

## 8. Cabashooyinka & Rafcaannada

8.1. Haddii qof shaqaale ah uu u arko in si aan caddaalad ahayn loogula dhaqmey arrin kasta oo la xiriirta Xeer-nidaamiyahan waxaa uu rafcaan u qaadan karaa Guddiga si uu arrinta ugu baaro si waafaqsan Habraacyada Rafcaannada ee lagu cayimey Qodobka 30aad ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017.

## 9. Ansaxinta Xeer-nidaamiyaha

9.1. Anniga oo adeegsanaya awoodaha ka Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee Dowlad-goboleedka Jubbaland la iigu siiyey Madaxa V, Qodobka 19aad, Faqradda 19.1 ee Xeerka Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017 iyo Madaxa VIII, Qaybta 33aad, Faqradda 33.1 ee Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda ee 2017, waxaan soo saarey Xeer-nidaamiyahan oo dhaqangelaya taariikhdan soo socota.

Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda
Dowlad-goboleedka Jubbaland ee Soomaaliya